



HAWLGALKA QARAMADA MIDOOBAY EE KAALMADA SOOMAALIYA (UNSOM)

Xafiiska Howlgalka Qaramadda Middobay u Qaabilsan Kaalmaynta Soomaaliya (UNSOM)

WARSAXAAFADEED 01/2013

Muqdisho: 8 Juun, 2013 – Ergayga Gaarka ah ee Xog-hayaha Guud ee Qaramadda Middobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya (SRSG), Nicholas Kay yaa maanta ku baaqay in si deg-deg ah loo joojiyo dagaalka ka socda magaalada Kismaayo. Sida ay sheegayaan warar aan la xaxiijin, dagaalku wuxuu bilowday shalay hadana manta ayuu dib u bilowday.

Ergayga- Gaarka ah waxa uu yiri: “waxaan ku guubaabinayaa dhammaan dhinacyadda ay arrintani khusayso in ay go’aansadaan sidii ay arrinta ugu xalinlahaayeen si nabadgelyo ku dheehantahay. Waxaan ka xumahay wararka sheegaya in dad rayid ah ay ku dhinteen dagaalka. Wixii hadda ka dambeeya- waa in ay taariikhda Soomaaliyeed qortaa in wixii khilaafaad ah lagu xalinayo si nabadi ku dheehantahay. Qas hor lehna waxa uu sii dheereynayaa dhibaataada dadka Soomaaliyeed oo keliya, sidoo kalena waxuu dib u dhigaayaa dib u soo kabashada dadka Soomaaliyeed iyo bulshada caalamkuba ay ka shaqeynaayaa. Xafiiska Qaramadda Middobay u Qaabilsan Howlgalka lagu kaalmeynayo Soomaaliya (UNSOM), sida Golaha Amaanka ay uu ku soo celiyay mar dhaweyto, wuxuu ka ciyaari doonaa doowr-waxtar leh habka xalinta khilaafaadyadda siyaasadeed. Xafiiskaas oo si hoose ula tasahanaayo dhamaan qaybaha Soomaaliyeed ee ay arrinta khuseyso iyo wadamada gobolkuba. Arrintaan hadda taaganna si dhaqso leh ayaan uga howlgalayaa.

Ergeyga-gaarka Mr. Kay ayaa arrimahan aan soo sheegnay kala hadlay Madaxweyne Xasan Sheikh Maxamuud, maanta oo ahayd markii ugu horreysay ee uu kulan rasmi ah uu magaalada Muqdisho ku la yeesho Madaxwaynaha. Madaxweynaha iyo Ergayga Gaarka ahba waxay ku baaqeen in sida ugu dhaqsi badan loo qabto shir dib u heshiisiin taasoo waafaqsan talo soo jeedintii ka soo baxday Madaxweynayaasha Ururka IGAD.

Mr. Kay waxuu la wareegay xilkiisa 3dii bishaan Juun, asagoo noqonaya Madaxa Xafiiska Cusub ee Howlgalka Qaramadda Middobay, UNSOM. Maanta Mudane Kay waxaa lagu soo dhoweeyay Villa Soomaaliya, waxaana ku qaabilay Madaxwayne Xasan Sheikh Maxamuud. Muqdisho waa magaalo Madaxda Dowladda Federaalka Soomaaliyeed.

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir Saraakiisha UNSOM u Qaabilsan Isgaarsiinta Guud
Mr. Aleem Siddique • Tel: +252 69 939 0218 • Email: unsom-spokesperson@un.org

Fadlan eeg rugta Internet-ka:
www.unsom.unmissions.org

 @UNSOMALIA  facebook.com/UNSOMALIA